

Iswidhan waxyar bay fureysaa xayndaabyadii

Laga bilaabo 1da luulyo dowladda waxa ay go'aamisay in ay fududayso qaar ka mid ah sharciyada la xiriira corona. Laakiin weli waa muhiim in la raaco talooyinka jira

Dad badan ayaa tagi kara riwaayadaha sidoo kale dad badan ayaa ka qayb qaadan kara tartamada ama daawan kara tartamada isboortiga. Makhaayaduhu way sii furnaan karaan xilli dheer sidoo kalena dadku way u wada fadhiisan karaan miiska iyaga oo dhowr dhowr ah.

Ka hor 1da Luulyo 8 qof ayaa la'ogalaa in ay ka qayb galaan xafladaha gaarka loo leeyahay. Laakin hadda waxaa la'ogolyahay in ay ka qayb galaan 50 qof. Wali waxaa wanaagsan in aad la kulantid oo kaliya dadka aad inta badan wada kulantaan. Sida ugu fiicana waa in ay kulamadaas ay ka dhacaan aqalka dibaddiisa.

Laakiin waxaa dhici karta in xeerarku isu badalaan si kadis ah. Degel rogashadan cusub ee caabuqa koronaha ayaa ah mid aad la isku qaadsiiyo isla markaana si dhakhso leh ku fida. Kanna waa mid ka jira Iswidhan. Haddii caabuqan cusub ee koronaha laga helo gobolka Kalmar waxaa jiri kara in la soo rogo sharciyo adag mar labaad. Sidaasina waxaa tidhi dhakhtaradda xakamaynta cudurrada faafa ee Lisa Labbé Sandelin.

Haddii uu qofku is tallaalo waxa uu helayaa difaac wanaagsan. Waa muhiim in la qaato laba cirbadood. Haddii dad badani is tallaalaan fayrasku uma fidi karayo si fudud. Waxaan sii wadaynaa kala fogaanshaha, dheecaanka iska qaadisata (ama in aan is baadhno) iyo in aan guriga joogno haddii aan xanuun dareenno. Xitaa haddii aad tallaalka qaadatay tani way ku khusaysaa. Haddii ay wax walba hagaagaan

waxaa la qaadi doonaa xayndaabyada dadka saaran sharciyo badanna way is beddeli doonaan mustaqbalka dhaw.

Waxa la soo gaadhay xilligii ay is tallaali lahaayeen dadka da'doodu tahay 30 iyo wixii ka wayn

Gobolku waxa uu hadda siinayaa fursad ay isku tallaali karayaan dadka jira 30 iyo wixii ka wayn. Waxa aad u baahantahay in aad ballan qabsato ka hor. Ballantana waxa aad ka samaysan kartaa bogga 1177.se ama wac xarunta caafimaadka taabo '0' si aad u hesho warbixino afka ingiriisiga ah. Riix '8' si aad u qabsato ballan.

Xarumaha caafimaadka qaarkood ayaa leh wakhtiyo ka soo kor dhac ah(in aad timaadid adiga oo aan lahayn ballan hore) Isha ku hay waxa ka socda rugtaada caafimaad.

Waa mamnuuc in lagu shido dabka meelaha kaymaha ah iyo dhulka.

Hadda waa mamnuuc in la shido dab ama wax lagu dubto kaymaha iyo meelaha bannaanada ah. Tani waxa ay khusaysaa dhammaan degmooyinka hoos yimaada gobolka Kalmar.

Mamnuucidda dab shididda waa xeer ka mid ah xeerarka Iswidhan. Haddii uu qofku jebiyo xeerkaas waxaa dhici karta in uu mutaysto ciqaab lagu qaado.



Halkan waxaad ku arki doontaa haddii lagu ogolyahay in aad dabshidi karto oo aad wax duban karto. Degmooyinka dabka huruudda ah waa ka mamnuuc. Kuwa cagaarka ahna waa la oggol yahay.

Sommarku hakuu wacnaado ! kuna raaxayso in aad wakhti ku qaadato guriga dibaddiisa adiga oo la kulmayo saaxiibadaa si ay ku dheehantahay taxadar iyo foajignaan.